# Tilmaamaha Kaalmada Baahiyaha Bulshada

Loogu Talagalay Xubnaha

Markii ugu dambeysay la cusboonaysiiyay: Maarso 2025

CareOregon®

# Mawduucyada


**Tilmaamaha Kaalmada Baahiyaha Bulshada CareOregon ..... 1**

**Health Related Social Needs (HRSN, Baahiyaha Bulsho ee La Xidhiidha Caafimaadka) ..... 1**

- Taageerada Guriyeynta HRSN ..... 1
  - U-qalmitaanka ..... 1
  - Xaaladaha caafimaad ee u qalma ..... 1
  - Xaaladaha nololeed ee u qalma ..... 2
  - Alaabooyinka iyo adeegyada la heli karo ..... 3
- Aaladaha Cimilada ee HRSN ..... 5
  - U-qalmitaanka ..... 5
  - Xaaladaha caafimaad ee u qalma ..... 5
  - Xaaladaha nololeed ee u qalma ..... 5
  - Alaabta la heli karo ..... 6
- Taageerada Nafaqada ee HRSN ..... 6
  - U-qalmitaanka ..... 6
  - Xaaladaha caafimaad ee u qalma ..... 6
  - Xaaladaha nololeed ee u qalma ..... 7
  - Adeegyada la heli karo ..... 7

**Health Related Service Fund (HRSF, Deeqda Adeegga La Xiriira Caafimaadka) ..... 8**

- Taageerada Guriyeynta HRSF ..... 8
  - U-qalmitaanka ..... 8
  - Xaaladaha caafimaad ee u qalma ..... 8
  - Alaabooyinka iyo adeegyada la heli karo ..... 8
- Aaladaha Cimilada ee HRSF ..... 10
  - U-qalmitaanka ..... 10
  - Xaaladaha caafimaad ee u qalma ..... 10
  - Alaabta la heli karo ..... 11
- Taageerada Nafaqada ee HRSF ..... 12
  - U-qalmitaanka ..... 12
  - Xaaladaha caafimaad ee u qalma ..... 12
  - Adeegyada la heli karo ..... 12
- HRSF Taageerooyinka Kale ee Bulshada ..... 12
  - U-qalmitaanka ..... 12
  - Alaabooyinka iyo adeegyada la heli karo ..... 13
  - Ka saaritaanada ..... 14

# Tilmaamaha Kaalmada Baahiyaha Bulshada CareOregon

Baahiyaha bulshada waxa ka mid ah cunto ku filan, gaadiid, meel lagu noolaado, waxbarasho, saaxiibo ku taageera, iyo helitaanka biyo iyo koronto. Marka aad heli weydo waxyaalahan oo kugu filan, waxay dhaawici kartaa jirkaaga iyo maskaxdaada labadaba. Markaad haysato waxaad u baahan tahay, waxay taasi kaa caawin kartaa inaad caafimaad qabtid oo aad dareento caafimaad guud ahaan. Hagahan waxaa loo sameeyay inuu kaa caawiyo inaad fahamto waxa loo baahan yahay si aad u hesho caawimaad.

# Health Related Social Needs (HRSN, Baahiyaha Bulsho ee La Xidhiidha Caafimaadka)

## Taageerada Guriyeynta HRSN

### U-qalmitaanka

Si aad ugu qalanto taageerada guriyeynta HRSN, dhammaan waxyaabaha soo socdaa waa inay ku khuseeyaan:

- Waa inaad noqotaa qof hadda xubin ka ah
- Ma heli kartid shayga/adeegga iyadoo loo marayo gunno kale ama si kale
- Waa inaad hadda qabto xaalad caafimaad iyo xaalad nololeed oo sida kuwan hoos ku qoran

### Xaaladaha caafimaad ee u qalma

- **Dadka waaweyn ee da'doodu tahay 65 iyo ka weyn**
- **Carruurta ka yar 6 sano**
- **Dhibaatooyinka caafimaadka habdhaqanka ee adag**
- **Dhibaatooyinka caafimaadka jirka ama ilkaha ee adag**
- Ka bixida gunnooyinka Medicaid-kaliya iyo **u-qalmitaanka Medicaid iyo Medicare labadaba**
- Xubnaha la kulmaya ama **la soo kulmay rabshadaha dadka dhexdooda ah (IPV, interpersonal violence).**
  Waxaana ka mid ah rabshadaha qoyska (DV, domestic violence), rabshadaha galmada (SV, sexual violence), ama rabshadaha nafsiga ah
- Xubnaha **uurka leh ama ku jira umul 12 bilood ah**
- Xubnaha **qaba naafanimada garaadka ama korriinka**
- Xubnaha **u baahan caawimaad ku aadan hal ama in ka badan oo hawlo nolol-maalmeed ah**
- Xubnaha si joogto ah u isticmaalay **waaxda gurmadka ama adeegyada xasaradaha**

## Xaaladaha nololeed ee u qalma

- Wixii kharashaadka kirada/tasiilaadka ah, baaqiga tamarta ama xiritaanka qalabyada, iyo khidmadaha kaydinta:
  - Xubnaha:
    - Haysta dakhli qoys kaas oo gaaraya 30% ama wax ka yar celceliska dakhliga sanadlaha ah ee halka ay ku nool yihiin OO aan haysan ilo taageero oo ay iska difaacaan guri la'aanta
    - Haysta guri kiro ah
    - U baahan taageero ku aadan sii deganaansho guri
    - Haysta heshiis kiro ama heshiis kiro oo qoraal ah

- Isbedelka guriga:
  - Xubnaha:
    - Ka tagaya xabsiga
    - Ka tagaya xarunta caafimaadka maskaxda ama xarunta ka soo kabashada isticmaalka maandooriyaha
    - Wakhti ku soo qaatay nidaamka daryeelka carruurta ee Oregon (daryeelka korinta) hadda ama wakhti hore
    - Ka baxaya gunnada Medicaid-kaliya ee u qalmaya Medicaid iyo Medicare labadaba
    - Haysta dakhli qoys kaas oo gaaraya 30% ama wax ka yar celceliska dakhliga sanadlaha ah ee halka ay ku nool yihiin OO aan haysan ilo taageero oo ay iska difaacaan guri la'aanta
    - U diiwaangashan sidii qof qaangaar ah oo da'yar oo leh baahiyaha daryeelka caafimaadka gaarka ah (YSHCN, Young Adult with Special Healthcare Needs)

- Joogitaanada huteelada/Mooteelada
  - Xubnaha:
    - Haysta dakhli qoys kaas oo gaaraya 30% ama wax ka yar celceliska dakhliga sanadlaha ah ee halka ay ku nool yihiin OO aan haysan ilo taageero oo ay iska difaacaan guri la'aanta
    - Helaya isbeddel guri
    - U baahan meel ay seexdaan inta lagu jiro shaqada beddelida guriga ee HRSN

## Alaabooyinka iyo adeegyada la heli karo

<table>
<tr><th>Adeegyada iyo alaabta</th><th>Xaddidaadyada</th><th>Ka saaritaanada</th></tr>
<tr><td colspan="3">Kiro</td></tr>
<tr><td>Lacag bixinta lagu daboolo kharashka xubinta ee kirada soo noqnoqota ama kirada wakhtigeeda dhaaftay ee ilaa lix bilood. Waxaana ka mid ah:<br>• Bixinta lacagta kirada<br>• Caymiska kiraystaha, haddii uu u baahdo heshiiska kirada<br>• Kharashaadka adeegyada guriga ee uu bixiyo mulkiilaha guriga oo aan hore loogu daboolin kaalmada tamarta</td><td>• La heli karo hal mar<br>• Ku xaddidan caddadka hadda lagu leeyahay, oo ay ku jirto wixii lacag kiro ah oo hore loogu lahaa<br>• Magaca xubinta codsanaysa waa inuu ku qornaadaa heshiiska kirada<br>• Xubintu waa inay si firfircoon uga diwaangashan tahay OHP wakhtiga caawimada la bixinayo</td><td>• Kharashyada xayawaanaad rabaayada ah (oo ay ku jiraan xayawaanada loo xannaanaysto taageerida shucuureed)<br>• Kharashyada baarkinka<br>• Kharashyada adeegyada<br>• Canshuuraha uu bixiyo mulkiilaha guriga<br>• Caymiska hantida/guriga<br>• Bixinta lacagaha kirada ee dadka guriga kula degan ama xubnaha kale ee kugula jira qorshaha caafimaadka</td></tr>
<tr><td colspan="3">Adeegyada guriga</td></tr>
<tr><td>Lacag-bixinta lagu daboolayo kharashyada xiritaanka ama dib-u-bilawga, ama adeegyada guriga ee wakhtigooda la soo dhaafay ama mustaqbalka la bixin doono, oo ay ku jiraan:<br>• Qashinka<br>• Biyaha<br>• Bulaacadaha<br>• Dib-u-warshadaynta<br>• Gaaska<br>• Korontada<br>• Internetka<br>• Taleefanka</td><td>• Ilaa lix bilood oo kaalmada adeegyada guriga ah oo ah lacag-bixinada kharashaadka wakhtigooda la soo dhaafay ama kuwa mustaqbalka<br>• Xubinta waa inuu HRSN ka helayaa kaalmada lacag bixinta kirada</td><td>• Biilasha adeegyada guriga ee aan ku qornayn magaca xubinta. Xubinta waa inuu muujiyaa caddayn muujinaysa in cinwaanka adeegyada lagu bixinayo uu yahay cinwaankooda/gurigooda<br>• Kharashyada adeegyada guriga ee mulkiilaha guriga</td></tr>
<tr><td colspan="3">Hoteelada/mooteelada</td></tr>
<tr><td>Lacag bixinta kharashka huteelka ama mooteelka.</td><td>Xubnuhu waxay u-qalmaan inay helaan taageero haddii aanay joogi karin gurigooda inta lagu jiro wax-ka-bedelida Guriga ee HRSN ee la ansixiyay</td><td>• Kharashyada xayawaanada rabaayada ah<br>• Kharashyada baarkinka<br>• Kharashyada adeegyada</td></tr>
</table>

| Adeegyada iyo alaabta | Xaddidaadyada | Ka saaritaanada |
|---|---|---|
| **Wax-ka-bedelida Guriga** | | |
| Isbeddel lagu sameeyo guriga xubinta, isbedelkaas oo meesha ka saaraya khataraha caafimaadka iyo badbaadada. Sidoo kale, xaqiijin in gurigooda uu ku habboon yahay baahidooda caafimaadka, badbaadada iyo hawl-maalmeedka.<br>Waxaana ka mid ah waxyaabaha soo socda:<br>• Dabaqyada<br>• Tiirarka qabsashada/xajinta<br>• Gacanka qabsiga ee albaabka iyo kaanada<br>• Ka takhalusidda cayayaanka<br>• Nadiifin qoto dheer<br>• Ku rakibida daahyada la dhaqi karo ama daahyada daaqadaha si looga hortaggo kicinta xasaasiyadda | • Waxaa hadba sida loogu baahdo loogu samayn karaa meesha uu hadda deggan yahay xubinta | • Wax-ka-bedelida guriga ee uu mas'uulka ka yahay mulkiilaha guriga inuu xalliyo<br>• Wax-ka-bedelida guriga ee loo samaynayo sababo la xiriira qaabaynta ama istaaylka guriga<br>• Wax-ka-bedelada ballaariya cabbirka guriga<br>• Dayactirka iyo hagaajinta guud ee guriga looga baahan yahay |
| **Kharashyada kaydinta** | | |
| Lacag bixinta kaydka badbaadada leh ee alaabta shakhsiyeed si gacan looga gaysto guuritaanka ama wakhtiga beddelida. | • Ilaa lix bilood oo ah kharashka kaydka hadda ah<br>• Xubinta waa in uu HRSN ka helayaa kaalmo ku aadan gunnada bixinta kirada<br>• La heli karo hal mar | • Kharashyada kaydka ee yunityada kaydka ee aan ganacsiga ahayn |

## Aaladaha Cimilada ee HRSN

### U-qalmitaanka

Si aad ugu qalanto taageerada qalabyada cimilada ee HRSN, dhammaan waxyaabaha soo socdaa waa inay ku khuseeyaan:

- Waa inaad noqotaa qof hadda xubin ka ah
- Ma heli kartid shayga/adeegga iyadoo loo marayo gunno kale ama si kale
- Waa inaad hadda qabto xaalad caafimaad iyo xaalad nololeed oo sida kuwan hoos ku qoran

### Xaaladaha caafimaad ee u qalma

- **Dadka waaweyn ee da'doodu tahay 65 iyo ka weyn**
- **Carruurta ka yar 6 sano**
- **Dhibaatooyinka caafimaadka habdhaqanka ee gaarka ah**
- **Dhibaatooyinka caafimaadka jirka iyo ilkaha ee gaarka ah**
- Xubnaha **uurka leh ama ku jira umul 12 bilood ah**
- Xubnaha qaba **naafanimada garaadka ama korriinka** halkaas oo baahida caafimaad ay kordhayso xilliyada cimiladu daran yihiin
- Xubnaha **u baahan in laga caawiyo hal ama in ka badan oo hawlaha nolol maalmeedka ah** halkaas oo baahida caafimaad ay kordhayso xilliyada cimiladu daran yihiin
- Xubnaha si joogto ah u isticmaalay **waaxda xaaladaha degdega ah ama adeegyada xasaradda** sabab la xiriirta dhibaato caafimaad ay cimiladu sababeen

### Xaaladaha nololeed ee u qalma

- **La kulmitaanka hoy la'aanta**
- Ka bixida **xabsiga**
- Ka bixida xarunta **caafimaadka dhimirka** ama xarunta ka soo kabashada **isticmaalka maandooriyaha**
- Nidaamka daryeelka carruurta ee Oregon (**daryeelka korinta**) hadda ama xilli hore
- Ka bixida gunnooyinka Medicaid-kaliya iyo **u-qalmitaanka Medicaid iyo Medicare labadaba**
- Qaba **dakhli qoys oo gaaraya 30% ama wax ka yar** celceliska dakhliga sanadlaha ah ee meesha aad ku nooshahay OO aan lahay ilo ama taageero loogaga hortago guri la'aanta
- U diiwaangashan sidii **Qof Qaangaar Ah oo Da'yar oo Leh Baahiyaha Daryeelka Caafimaadka Gaarka Ah** (YSHCN)

### Alaabta la heli karo

| Shayga | Xaddidaadyada |
|---|---|
| Qaboojiyaha hawada | • Hal qalab oo beddel ah saddexdii sannadoodba mar |
| Qalabka sifaynta hawada | • Hal qalab oo beddel ah saddexdii sannadoodba mar |
| Kuleyliyaha | • Hal qalab oo beddel ah saddexdii sannadoodba mar |
| Yunitka qaboojiyaha-yar | • Ku xaddidan u isticmaalida daawooyinka ama nafaqada dareeraha ah ee u baahan qaboojinta<br>• Hal qalab oo beddel ah saddexdii sannadoodba mar |
| Qalab koronto oo la qaadan karo | • Ku xaddidan ku isticmaalida qalabyada ama tignoolajiyada caafimaadka ee u baahan koronto oo lagama maarmaanka u ah isgaarsiinta ama dhaqdhaqaaqyada nolol maalmeedka (ADL)<br>• Hal qalab oo beddel ah saddexdii sannadoodba mar |

## Taageerada Nafaqada ee HRSN

### U-qalmitaanka

Si aad ugu qalanto taageerada nafaqeynta ee HRSN, dhammaan waxyaabaha soo socdaa waa inay ku khuseeyaan:

- Waa inaad noqotaa qof hadda xubin ka ah
- Ma heli kartid shayga/adeegga iyadoo loo marayo gunno kale ama si kale
- Waa inay ku hayso cunto yari
- Waa inaad hadda qabto xaalad caafimaad iyo xaalad nololeed oo sida kuwan hoos ku qoran

### Xaaladaha caafimaad ee u qalma

- Cuntooyinka caafimaad ahaan ku habboon:
  - Xubnaha qaba xaalad caafimaad u baahan cunto gaar ah
- Waxbarashada nafaqada:
  - **Dadka waaweyn ee da'doodu tahay 65 iyo ka weyn**
  - **Carruurta ka yar 6 sano**
  - **Dhibaatooyinka caafimaadka habdhaqanka ee adag**
  - **Dhibaatooyinka caafimaadka jirka ama ilkaha ee adag**
  - Xubnaha u gudbaya xaalada qabitaanka **Medicaid iyo Medicare labaduba**
  - Xubnaha la soo kulmaya ama **la soo kulmay rabshadaha dadka dhexdooda ah (IPV)**, oo ay ku jiraan rabshadaha qoyska (DV), rabshadaha galmada (SV), ama rabshadaha nafsiga ah
  - Xubnaha **uurka leh ama ku jira umul 12 bilood ah**
  - Xubnaha **qaba naafanimada garaadka ama korriinka**
  - Xubnaha **u baahan caawimaad ku aadan hal ama in ka badan oo hawlo nolol-maalmeed ah**
  - Xubnaha si joogto ah u isticmaalay **waaxda gurmadka ama adeegyada xasaradaha**

## Xaaladaha nololeed ee u qalma

- **La kulmitaanka hoy la'aanta**
- Ka bixida **xabsiga**
- Ka bixida xarunta **caafimaadka dhimirka** ama xarunta ka soo kabashada **isticmaalka maandooriyaha**
- Nidaamka daryeelka carruurta ee Oregon (**daryeelka korinta**) hadda ama xilli hore
- Ka bixida gunnada Medicaid-kaliya iyo u gudbitaanka u qalmitaanka **Medicaid iyo Medicare**
- Qaba **dakhli qoys oo gaaraya 30% ama wax ka yar** celceliska dakhliga sanadlaha ah ee meesha aad ku nooshahay OO aan lahay ilo ama taageero loogaga hortago guri la'aanta
- U diiwaangashan sidii **Qof Qaangaar Ah oo Da'yar oo Leh Baahiyaha Daryeelka Caafimaadka Gaarka Ah** (YSHCN)

## Adeegyada la heli karo

| Adeegyada | Xaddidaadyada |
|---|---|
| Qiimaynta cuntooyinka caafimaad ahaan ku habboon<br>La kulmida khabiirka cuntada oo hubin kara caafimaadka xubinta si uu u eego haddii ay u baahan yihiin cuntooyin gaar ah oo loogu talagalay ama ku habboon xaaladdooda caafimaad. | |
| Cuntooyinka caafimaad ahaan ku habboon<br>Cuntooyinka sida gaarka ah loogu qaabeeyay xaaladaha caafimaad ee xubinta. | • Cuntooyinka waa in la geeyaa guriga xubinta ama meel kasta oo ay ku nool yihiin. Meelahaas waxa ku jiri kara hoyga aan cuntada lagu bixin<br>• Xubintu waxay heli kartaa ilaa saddex cunto maalintii ilaa lix bilood<br>• Haddii xubinta uu ku nool yahay meel looga baahan yahay in loogu adeego cunto, ma heli karaan adeeggan<br>• Xubintu waa in ay haysataa meel ay si badbaado leh loogu kaydin karo laguna diyaarin karo cuntada |
| Waxbarashada nafaqada<br>Nooc kasta oo waxbarasho ah oo ka caawinaysa xubinta inuu sameeyo xulashooyin cunto oo caafimaad leh isla markaana daryeeli kara jirkiisa. | • Adeegan lama isticmaali karo haddii xubintu ay adeeg la mid ah adeeggan ku heli karto gunnada caafimaad |

# Health Related Service Fund (HRSF, Deeqda Adeegga La Xiriira Caafimaadka)

## Taageerada Guriyeynta HRSF

### U-qalmitaanka

Si aad ugu qalanta taageerada guriyeynta HRSF, dhammaan waxyaabaha soo socdaa waa inay ku khuseeyaan:

- Waa inaad noqotaa qof hadda xubin ka ah
- Ma heli kartid shayga/adeegga iyadoo loo marayo gunno kale ama si kale
- Waa inaad qabtaa xaalad caafimaad oo hadda jirta sida kuwan hoos ku qoran

### Xaaladaha caafimaad ee u qalma

- **Dadka waaweyn ee da'doodu tahay 65 iyo ka weyn**
- **Carruurta ka yar 6 sano**
- **Dhibaatooyinka caafimaadka habdhaqanka ee adag**
- **Dhibaatooyinka caafimaadka jirka ama ilkaha ee adag**
- Xubnaha u gudbaya xaalada qabitaanka **Medicaid iyo Medicare labaduba**
- Xubnaha la soo kulmaya ama **la soo kulmay rabshadaha dadka dhexdooda ah (IPV)**, oo ay ku jiraan rabshadaha qoyska (DV), rabshadaha galmada (SV), ama rabshadaha nafsiga ah
- Xubnaha **uurka leh ama ku jira umul 12 bilood ah**
- Xubnaha **qaba naafanimada garaadka ama korriinka**
- Xubnaha **u baahan caawimaad ku aadan hal ama in ka badan oo hawlo nolol-maalmeed ah**
- Xubnaha si joogto ah u isticmaalay **waaxda gurmadka ama adeegyada xasaradaha**

### Alaabooyinka iyo adeegyada la heli karo

| Adeegyada iyo alaabta | Xaddidaadyada | Ka saaritaanada |
|---|---|---|
| **Kiro** | | |
| Lacag bixinta lagu daboolayo kharashka kirada soo noqnoqota ee xubinta ama kirada wakhtigeed la soo dhaafay ee ilaa saddex bilood ah.<br>Waxaana ka mid ah:<br>• Bixinta lacagta kirada<br>• Caymiska kiraystaha, haddii uu u baahdo heshiiska kirada<br>• Kharashaadka adeegyada guriga ee uu bixiyo mulkiilaha guriga oo aan hore loogu daboolin kaalmada tamarta | • La heli karo saddexdii sanaba hal mar<br>• Ku xaddidan caddadka hadda lagu leeyahay, oo ay ku jirto wixii lacag kiro ah oo hore loogu lahaa<br>• Magaca xubinta codsanaysa waa inuu ku qornaadaa heshiiska kirada<br>• Xubinta waa inuu si firfircoon uga diiwaangashan yahay OHP wakhtiga caawimada la bixinayo | • Kharashyada xayawaanaad rabaayada ah (oo ay ku jiraan xayawaanada loo xannaanaysto taageerida shucuureed)<br>• Kharashyada baarkinka<br>• Kharashyada adeegyada<br>• Canshuuraha uu bixiyo mulkiilaha guriga<br>• Caymiska hantida/guriga |

| Adeegyada iyo alaabta | Xaddidaadyada | Ka saaritaanada |
|---|---|---|
| | • Xubinta waa inuu muujiyaa awooda uu ku bixin karo kirada mustaqbalka | • Bixinta lacagaha kirada ee dadka guriga kula degan ama xubnaha kale ee kugula jira qorshaha caafimaadka |
| **Adeegyada guriga** | | |
| Lacag bixinta lagu daboolayo kharashyada xiritaanka ama dib-u-bilawga, ama adeegyada guriga ee wakhtigeeda la dhaafay ama la bixin doono mustaqbalka<br>• Qashinka<br>• Biyaha<br>• Bulaacadaha<br>• Dib-u-warshadaynta<br>• Gaaska<br>• Korontada<br>• Internetka<br>• Taleefanka | • Ilaa lix bilood oo caawimaad ah oo ku aadan lacag bixinta adeegyada guriga ee wakhtigooda la dhaafay ama la bixin doona mustaqbalka<br>• La heli karo saddexdii sanaba hal mar<br>• Xubinta waa inuu muujiyaa awooda uu ku bixin karo kharashaadka adeegyada guriga ee mustaqbalka | • Biilasha adeegyada guriga ee aan ku qornayn magaca xubinta. Xubinta waa inuu muujiyaa caddayn ah in cinwaanka adeeggu yahay cinwaanka xubinta.<br>• Kharashyada adeegyada guriga ee mulkiilaha guriga |
| **Hoteelada/mooteelada** | | |
| Lacag bixinta kharashka huteelka ama mooteelka. | Xubnaha waxay xaq u leeyihiin inay helaan taageero ku aadan xaaladaha soo socda:<br>• Katagidda isbitaalka iyada oo aan jirin meel xubinta uu ku noolaado<br>• Dhacdo cimilada la xiriirta oo daran oo ka sii darsiin karta xaalada caafimaad ee xubinta<br>• Ka bixitaanka guri la'aanta iyo u guuritaanka guri cusub saddexda bilood ee soo socda gudahood<br>• Awood la'aanta ah in lagu sii jiro guriga inta lagu jiro wax-ka-bedelida Guriga | • Kharashyada xayawaanada rabaayada ah<br>• Kharashyada baarkinka<br>• Kharashyada adeegyada |

| Adeegyada iyo alaabta | Xaddidaadyada | Ka saaritaanada |
|---|---|---|
| **Wax-ka-bedelida Guriga** | | |
| Isbeddel ku samaynta guriga xubinta si meesha looga saaro khataraha caafimaadka iyo badbaadada. Xaqiijinta in gurigu ku habboon yahay baahidooda caafimaadka, badbaadada, iyo hawl maalmeedka.<br>Waxaa ka mid ah adeegyada soo socda:<br>• Dabaqyada<br>• Tiirarka qabsashada/xajinta<br>• Gacanka qabsiga ee albaabka iyo kaanada<br>• Ka takhalusidda cayayaanka<br>• Nadiifin qoto dheer<br>• Ku rakibida daahyada la dhaqi karo ama daahyada daaqadaha si looga hortaggo kicinta xasaasiyadda | • Waxay hadba sida loogu baahdo ugu dhici karaan meesha uu hadda deggan yahay xubinta<br>• Codsiga waa in lagu daraa qiyaasta qiimaha faahfaahsan ee isbeddelka loo baahan yahay | • Wax-ka-bedelida guriga ee uu mas'uulka ka yahay mulkiilaha guriga inuu xalliyo<br>• Wax-ka-bedelida guriga ee loo samaynayo sababo la xiriira qaabaynta ama istaaylka guriga<br>• Wax-ka-bedelada ballaariya cabbirka guriga<br>• Dayactirka iyo hagaajinta guud ee guriga looga baahan yahay |
| **Kharashyada kaydinta** | | |
| Lacag bixinta kaydinta alaabta shakhsiyeed si looga caawiyo guuritaanka ama wakhtiga wax-ka-bedelida guriga, si alaabta xubinta si badbaado leh loogu hayo ama loogu guuriyo. | • Ilaa lix bilood oo ah kharashka kaydinta hadda ee saddexdii sanaba | • Kharashyada kaydka ee yunityada kaydka ee aan ganacsiga ahayn |
| **Kharashyada guuritaanka** | | |
| Caawimaad ku aadan u diyaargarowga ama taageero ku aadan guuritaanka | • La heli karo hal mar guuritaan kasta | • Lama oggola u guuritaan meel ka baxsan gobolka |

## Aaladaha Cimilada ee HRSF

### U-qalmitaanka

Si aad ugu qalanto taageerada aaladaha cimilada ee HRSF, dhammaan waxyaabaha soo socda waa inay ku khuseeyaan:

- Waa inaad noqotaa qof hadda xubin ka ah
- Ma heli kartid shayga/adeegga iyadoo loo marayo gunno kale ama si kale
- Waa inaad qabtaa xaalad caafimaad oo hadda jirta sida kuwan hoos ku qoran

### Xaaladaha caafimaad ee u qalma

- Dadka waaweyn ee da'doodu tahay 65 iyo ka weyn
- Carruurta ka yar 6 sano
- Dhibaatooyinka caafimaadka habdhaqanka ee gaarka ah

- **Dhibaatooyinka caafimaadka jirka iyo ilkaha ee gaarka ah**
- Xubnaha **uurka leh ama ku jira umul 12 bilood ah**
- Xubnaha qaba **naafanimada garaadka ama korriinka** halkaas oo baahida caafimaad ay kordhayso xilliyada cimiladu daran yihiin
- Xubnaha **u baahan in laga caawiyo hal ama in ka badan oo hawlaha nolol maalmeedka ah** halkaas oo baahida caafimaad ay kordhayso xilliyada cimiladu daran yihiin
- Xubnaha si joogto ah u isticmaalay **waaxda xaaladaha degdega ah ama adeegyada xasaradda** sabab la xiriirta dhibaato caafimaad ay cimiladu sababeen

## Alaabta la heli karo

| Shayga | Xaddidaadyada |
|---|---|
| Qaboojiyaha hawada | • Hal qalab oo beddel ah saddexdii sannadoodba mar |
| Qalabka sifaynta hawada | • Hal qalab oo beddel ah saddexdii sannadoodba mar |
| Kuleyliyaha | • Hal qalab oo beddel ah saddexdii sannadoodba mar |
| Yunitka qaboojiyaha-yar | • Ku xaddidan u isticmaalida daawooyinka ama nafaqada dareeraha ah ee u baahan qaboojinta<br>• Hal qalab oo beddel ah saddexdii sannadoodba mar |
| Qalab koronto oo la qaadan karo | • Ku xaddidan ku isticmaalida qalabyada ama tignoolajiyada caafimaadka ee u baahan koronto oo lagama maarmaanka u ah isgaarsiinta ama dhaqdhaqaaqyada nolol maalmeedka (ADL)<br>• Hal qalab oo beddel ah saddexdii sannadoodba mar |

## Taageerada Nafaqada ee HRSF

### U-qalmitaanka

Si aad xaq ugu yeelato taageerada nafaqeynta ee HRSF, dhammaan waxyaabaha soo socda waa in ay ku khuseeyaan:

- Waa inaad noqotaa qof hadda xubin ka ah
- Ma heli kartid shayga/adeegga iyadoo loo marayo gunno kale ama si kale
- Waa inay ku hayso cunto yari
- Waa inaad hadda qabto xaalad caafimaad iyo xaalad nololeed oo sida kuwan hoos ku qoran

### Xaaladaha caafimaad ee u qalma

- Dadka waaweyn ee da'doodu tahay 65 iyo ka weyn
- Carruurta ka yar 6 sano
- Dhibaatooyinka caafimaadka habdhaqanka ee adag
- Dhibaatooyinka caafimaadka jirka ama ilkaha ee adag
- Xubnaha u gudbaya xaalada qabitaanka **Medicaid iyo Medicare labaduba**
- Xubnaha la soo kulmaya ama **la soo kulmay rabshadaha dadka dhexdooda ah (IPV)**, oo ay ku jiraan rabshadaha qoyska (DV), rabshadaha galmada (SV), ama rabshadaha nafsiga ah
- Xubnaha **uurka leh ama ku jira umul 12 bilood ah**
- Xubnaha **qaba naafanimada garaadka ama korriinka**
- Xubnaha **u baahan caawimaad ku aadan hal ama in ka badan oo hawlo nolol-maalmeed ah**
- Xubnaha si joogto ah u isticmaalay **waaxda gurmadka ama adeegyada xasaradaha**

### Adeegyada la heli karo

| Adeegyada | Xaddidaadyada |
|---|---|
| Bolisyada cuntada<br>Cuntooyinka gaarka ah ee laga helo beeraha iyo kooxaha kale ee deegaanka | • Kaliya loogu talagalay dhibaatooyinka caafimaadka jirka ama ilkaha ee adag |
| Waxbarashada nafaqada<br>Nooc kasta oo waxbarasho ah oo ka caawinaysa xubinta inuu sameeyo xulashooyin cunto oo caafimaad leh isla markaana daryeeli kara jirkiisa. | |

## HRSF Taageerooyinka Kale ee Bulshada

### U-qalmitaanka

Si aad ugu qalanto taageerooyinka kale ee bulshada, dhammaan kuwa soo socdaa waa inay ku khuseeyaan:

- Waa inaad noqotaa qof hadda xubin ka ah
- Ma heli kartid shayga/adeegga iyadoo loo marayo gunno kale ama si kale
- Shayga ama adeeggu waa inay kaa caawiyaan xaaladaada caafimaad

## Alaabooyinka iyo adeegyada la heli karo

Halkan waxaa ku yaala tusaalooyinka taageerooyinka guud ee loogu talagalay baahiyaha bulshada. Liiskani kama koobna wax kasta oo aan caawimaad ka bixin karno. Haddii aad u baahan tahay in wax lagaaga caawiyo caafimaadkaaga oo aan liiska ku jirin, kaliya na waydii waxaanu tixgelin doonaa codsigaga. Shuruudaha lacag bixinta way kala duwanaan doonaan iyadoo ku xiran shayga ama adeegga aad codsanayso.

| Adeegyada iyo alaabta | Xaaladaha caafimaad iyo xaaladaha nolosha ee u qalma |
|---|---|
| Waxyaabaha taageera dareenka (Busteyaal miisaan leh, agabyada hurdada, foojarada fasalada yoga, iwm.) | • Xubnaha la halgamaya xanuunka ootisimka, walaaca ama niyad-jabka |
| Dayactirka baabuurta | • Xubnaha ku dhex nool gaarigooda ee oo u baahan dayactir gaari oo yar |
| Dharka | • Xubnaha iskaga dhex baxaya rabshadaha qoyska |
| Qalabka ilmaha (kursiga gaariga ama gaariga-carruurta) | • Xubnaha uurka leh ama umusha ku jira |
| Aaladaha elegtarooniga ah sida aaladaha isgaarsiinta ama taabletyada | • Carruurta la halgamaya xanuunka ootisimka, walaaca, niyad-jabka |
| Qalabyada waxbarashada ama buugaagta | • Xaalado caafimaad oo jireed oo adag |
| Qalabyada jimicsiga iyo xubinimada jimicsiga | • Xaalado caafimaad oo jireed oo adag |
| Ka diiwaangelinta kaamka/xerada | • Carruurta qabta xanuunka ootisimka ama niyad-jabka, iwm. |
| Alaabooyinka nadaafadda afka (cadayga) | • Xubnaha dejistay yoolalka daawaynta si looga hortago cilladaha caafimaadka afka/ilkaha |

## Ka saaritaanada

Taageerooyinka iyo adeegyada soo socdaa hadda LAMA daboolo:

- Codsiyada ah in magdhow laga bixiyo alaabta ama adeegyada aan la daboolin
- Alaabooyinka iyo adeegyada ku jira gunnooyinka qorshahaaga caafimaadka.
- Biilasha kaararka kiridhitka ama bixinta deynta
- Lacag bixinta amaahda
- Khidmadaha (khidmadaha xayawaanaadka rabaayada ah, khidmadaha sharciga, iwm.)
- Lacag bixinta loogu talagalay daryeel bixiyayaasha ama taageerooyinka kale ee mudada dheer ee la soo kireystay
- Kaararka gaadiidka dadweynaha ama kaararka gaaska
- Lacag bixinta loogu talagalay dadka aan xubnaha ka ahayn, sida bixinta kharashaadka adeegyada guriga ee dadka aan xubin ka ahayn ama qalabka qaboojiyaha hawada u gaditaanka qof aan ku noolayn gurigaaga
- Lacag bixinta la xiriirta dhismaha waxyaabo cusub
- Kaabayaasha nafaqeynta ee guud
- Iibka buugaagta waxbarashada
- Iibka guri ama baabuur
- Lacag bixinta baabuurka ama dayactirka weyn ee baabuurta
- Iibka waxyaabaha lagu qurxiyo guriga
- Fasaxyada dalxiiska ama safar kale
- Qalabyada korontada ku shaqeeya ee guriga ee aan lagu daboolin gunnada aaladaha cimilada
- Shay kasta ama adeeg kasta oo leh faa'iidooyin aan la xaqiijin
- Adeegyada ilkaha ee uu qabto adeeg-bixiyaha ilkaha (biraha ilkaha, wax-ku-beerista jirka, etc.)

Waxaad heli kartaa agabyadan oo ku qoran afaf kale, far waaweyn, farta indhoolaha ama ah qaabka aad doorbidayso.
Waxaad sidoo kale codsan kartaa turjumaan.
Caawimadani waa bilaash. Wac 800-224-4840 ama TTY 711.
Waxaan aqbalnaa wicitaanada gudbinta.
Waxaad caawimaad ka heli kartaa turjumaanka daryeelka caafimaadka oo shahaado haysta oo aqoon leh.

OHP-25-6430

OHP-24837003-0327